

Waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta waxaa laga helaa kanaalka Helsinki

Jardiinooyinka ciyaarta ee Helsinki waxay ilmaha dhallaanka ah, kuwa saanqaadka ah, qoysaska carruurta leh iyo dugsileydaba u kanaalada elektroonigga ah ugu qabanqaabiyaan wakhti ciyaar ah iyo waxqabad ah. Barnaamjka taxanaha ee Maanta waxaan ku ciyaaraynaa jardiinada ciyaartu wuxuu qoysaska ilmaha dhallaanka ah haysta u soo bandhigayaa tusaale ahaan heesta Kukkuluuruu. Kooxda muusikada Carruurta fardaha ayaa carruurta waaweyn ee qoyska hees u qaadaysa islamarkaasna ciyaarsiinaysa. Kaalay oo ka qayqbaado ciyaarta iyo waxqabadka!

Kanaalka Helsinki (www.helsinkikanava.fi) ayaa lagu soo bandhigayaa taxanaha barnaamjka cusub ee jardiinooyinka ciyaarta "Maanta waxaan ku ciyaaraynaa jardiinada carruurta". Kanaalka Helsinki waxaa laga daawan karaa fiidiowyko ku saabsan wakhtiga waxbaqabadka iyo ciyaarta oo ay qoysaska kala duduwan soo codsadeen. Fiidiowyada waxaa la soo bandhigayaa laga billaabo 9.4. Talaado iyo Khamiis kasta.

Jardiinooyinka ciyaarta iyo guryaha qoysasku waxay bogagga internetka iyo Facebook ku soo bandhigayaan wakhtiyada waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta ee todobaadlaha ah oo loogu talagalay qoysaska iyo dugsileyda guryaha jooga. Ciyaaraha jardiinooyinka ciyaarta, hawlgacmeedka hiwayayadda ah iyo jimicsiguba waxay dadka ciyaaraya sii wadan karaa iyagoo gurigooda jooga. Waxaa kale oo macluumaadyada lagu soo bandhigayaa luqadda iswiidhishka, ingiriiska, carabiga, ruushka iyo soomaaliga.

"Islamarkii uu billowday xukunka degdegga ah ee hadda jira ayaan macaamiisha ka helay codsiyo badan oo ku saabsan in fidhiyow lagu duubo wakhtiyada waxqabadka la hagayo kaddibna la soo geliyo kanaalada elektroonigga ah. Waa wax wanaagsan in waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta loo qabanqaabiyo qoysaska oo guryahooda jooga iyo in loo fidhiyo wax wanaagsan oo ay wadajir u sameeyaan. Sii wado habsami-socodka nololmaameedka iyo arrimaha ay u barteenba waa u muhiim qoyska xittaa marka lagu jiro xaaladahan gaarka ah", sidaa waxaa tiri Hanna Linna, madaxa waxqabadka jardiinooyinka ciyaarta iyo kan galabti.

Fikradda Mashruuca Soo jiidashada jardiinada ciyaarta ee cusub waa kordhinta aqoonsashada iyo helitaanka jardiinooyinka ciyaarta. Jardiinooyinka ciyaartu waa goobaha furan ee Helsinki ee ay dadka ku kulmaan islamarkaasna nocoyo badan, xarumaha xaafadaha magaalada – haddana waxaa laga heli karaa kanaalka Helsinki.